



Bushqada Furashada Medicaid

Qoraal ku socda adeega macmiilka iyo bixiyayaasha adeega:

Qoraalka taleefanka ee soo socda iyo su'aalaha badanaa la is waydiiyo (FAQs) waxaa loo abuuray inay ka caawiyaan xubnaha Medicaid inay gartaan waxay samaynayaan marka kiiskooda la naqdinayo. Waxa aanu ku telinaynaa inaad isku daydaan inaad isticmaashaan hadalka ku qoran qoraalkan iyo qaybta FAQ ilaa inta macquulka ah marka aad ka hadlayso isbedeladan.

Isbedelada Medicaid— iyo talaabooyinka qof looga baahan yahay inuu qaado— aad ayay u adag yihiin in la sharaxo oo la fahmo. Waxa aanu doonaynaa in aanu u fududayno ilaa macquulka ah adiga **iy**o dadka aad u adeegto. Hadalka ku qoran waraaqahan waxaa looga fiirsaday si wanaagsan oo waxaa la naqdiyay qaabka uu ku qoran yahay si macluumaad uu gacan uga gaysto in macluumaadka muhiimka ah si fudud loo fahmo oo la isticmaalo.

Qoraalka:

Intii lagu jiray safmarka COVID-19, dadka haysta Medicaid way ku sii jireen, xataa hadii ayna wixii intaa ka danbeeya u qalmin. COVID-19 maaha wixii intaa ka danbeeya xaalad caafimaad oo degdega ah oo shacab. Tani waxay ka dhigan tahay in loo baahan yahay in aanu naqdino dhamaan kiisaska Medicaid si aanu u ogaano cidda weli u qalanta.

Waaxda Adeegyada Shaqaalaha (DWS) waxay bilawday naqdinta u qalanka Medicaid Maarso 1, 2023. **Tani waxay ka dhigan tahay in adiga ama xubin qoyska ah ay waayi karto caymiska caafimaadka Medicaid hadii aanad u qalmin wixii intaa ka danbeeya Medicaid.** Waxa aanu naqdin doonaa kiiskaaga kahor Maarso 2024 si aanu u ogaano inaad weli u qalanto Medicaid.

Waxaa lagugula soo xidhiidhi doonaa boosta ama iimeel marka kiiskaaga la gaadho wakhtigii la naqdinayay. Waxa aad la hadli kartaa Waaxda Adeegyada Shaqaalaha (DWS) ama ka eeg [myCase](#) hadii aad doonayso inaad ogaato bisha kiiskaaga la naqdin doono.

Waxba inaad samayso lagaagama baahna illaa inta kiiskaaga la naqdinayo. Waxa aad u isticmaali kartaa gunooyinkaaga sida caadiga ah ilaa inta naqdintaada la dhamaystirayo. Waxa kaliya ee lagaaga baahan yahay waa inaad xaqiijiso in macluumaadka aanu kaa haynaa inuu sax yahay.

- **Xaqiiji in macluumaadkaaga uu cusboon yahay.**



- Waxa aad eegi kartaa si aad u xaqiijiso in macluumaadkaaga uu saxan yahay ku jira xisaabtaada [myCase](#).

Waa inaad cusboonaysiiso macluumaadkaaga hadii aad dhawaan guurtay ama hadii wax kamid ah macluumaadkaaga xidhiidhka ah la bedeley (sida lambarka taleefanka ama cinwaanka iimeelka). Waaxda Adeegyada Shaqaalaha (DWS) waxay kuusoo diri doontaa warqad ay ku qoran tahay **mid** kamid ah kuwa soo socda:

- Waxaad weli u **qalantaa** caymiska caafimaadka ee Medicaid.
- Uma **qalantid** Medicaid wixii intaa ka danbeeya. Warqadan waxaa ku qoran talaabada xigta ee aad qaadayso si aad u hesho caymis caafimaad oo kale.
- Waxay u baahan yihiin **macluumaad dheeraad ah** si loo eego hadii weli aad u qalanto Medicaid. Warqadan waxaa la socda foomamka aad buuxinayso oo waxay dalban karaan waraaqo xoojin ah (sida waraaqaha mushaharka, bayaanka bangiga, iwm.).

U fiirso wakhtiga ay ku eeg tahay.

Waxa aad weeyi kartaa gunooyinkaaga Medicaid hadii aanad soo celin foomamka ama aad dhaafiso wakhtiga ay ku eeg yihiin.

Ma doonaysaa in aan kuu eego si loo xaqiijiyo in macluumaadku inay cusboon yihiin?

Waxa aan kuu cusboonaysiin karaa macluumaadkaas iminka hadii aad doonayso, ama waxa aad la hadli kartaa cid kamid ah kuwa soo socda si ay u cusboonaysiiyaan macluumaadkaaga:

- Qorshahaaga caafimaadka
- Waaxda Adeegyada Shaqaalaha 1-866-435-7414
- Wakiilka barnaamijka caafimaadka 1-866-608-9422

Miyaad wax su'aalo ah qabtaa?



Su`aalaha Inta badan la Isweydiyo

Maxaa loo bedelayaa Medicaid?

Intii lagu jiray safmarka COVID-19, dadka haysta Medicaid way ku sii jireen, xataa hadii ayna wixii intaa ka danbeeya u qalmin. COVID-19 maaha wixii intaa ka danbeeya xaalad caafimaad oo degdega ah oo shacab. Tani waxay ka dhigan tahay in loo baahan yahay in aanu naqdino dhamaan kiisaska Medicaid si aanu u ogaano cidda weli u qalanta.

Waxda Adeegyada Shaqaalaha (DWS) waxay bilawday naqdinta u qalanka Medicaid Maarso 1, 2023. **Tani waxay ka dhigan tahay in adiga ama xubin qoyska ah ay waayi karto caymiska caafimaadka Medicaid hadii aanad u qalmin wixii intaa ka danbeeya Medicaid.** Waxa aanu naqdin doonaa kiiskaaga kahor Maarso 2024 si aanu u ogaano inaad weli u qalanto Medicaid.

Maxaan ubaahanahay inaan sameeyo?

Waxba inaad samayso lagaagama baahna illaa inta kiiskaaga la naqdinayo. Waxa aad u isticmaali kartaa gunooyinkaaga sida caadiga ah ilaa inta naqdintaada la dhamaystirayo. Xaqiiji in aanu kaa hayno macluumaadka xidhiidhka ee saxda ah adiga. Waxa aad eegi kartaa si aad u xaqiijiso in aanu gelino macluumaadka ugu danbeeya xisaabtaada [myCase](#).

- Geli macluumaadkaaga ugu danbeeyay hadii aad dhawaan guurtay ama hadii wax kamid ah macluumaadkaaga xidhiidhka ah la bedeley (sida lambarka taleefanka ama cinwaanka iimeelka).

Waxa aad weli la hadli kartaa mid kamid ah kuwa soo socda si aad u cusboonaysiiso macluumaadkaaga:

- Qorshahaaga caafimaadka
- Waxda Adeegyada Shaqaalaha 1-866-435-7414
- Wakiilka barnaamijka caafimaadka 1-866-608-9422

Sidee ayaan ku garanayaa in aan weli u qalmo Medicaid?

U fiirso xisaabtaada iimeelada, boosta iyo xisaabta [myCase](#). Waxda Adeegyada Shaqaalaha (DWS) waxa ay gelin doonaan macluumaadkaaga ugu danbeeyay xisaabtaada



myCase oo waxay kuusoo diri doonaan warqad ama iimeel kadib marka kiiskaaga la naqdiyo.

Waaxda Adeegyada Shaqaalaha waxay kusoo diri doontaa warqadan ay ku qoran tahay **mid** kamid ah kuwa soo socda:

- Waxaad **weli u qalantaa** caymiska caafimaadka ee Medicaid.
- Uma **qalantid** Medicaid wixii intaa ka danbeeya. Warqadan waxaa ku qoran talaabada xigta ee aad qaadayso si aad u hesho caymis caafimaad oo kale.
- Waxay u baahan yihiin **macluumaad dheeraad ah** si loo eego hadii weli aad u qalanto Medicaid. Warqadan waxaa la socda foomamka aad buuxinayso oo waxay dalban karaan waraaqo xoojin ah (sida waraaqaha mushaharka, bayaanka bangiga, iwm.).

Sidee ayaan u ogaanayaa taariikhdayda naqdinta?

Waxa aad ka eegi kartaa xisaabtaada [myCase](#) ama lasoo hadal mid kamid ah kuwa soo socda hadii aad doonayso inaad ogaato bisha kiiskaaga la naqdinayo:

- Qorshahaaga caafimaadka
- Waaxda Adeegyada Shaqaalaha 1-866-435-7414
- Wakiilka barnaamijka caafimaadka 1-866-608-9422

Maxaan u baahnahay in aan sameeyo kadib kiiskayga marka la naqdiyo?

Raac tilmaamaha ku yaala warqada aad ka heshey Waaxda Adeegyada Shaqaalaha. Buuxi **dhamaan** foomamka la naqdinayo oo waxa aad ugu dirta iyada iimeel ama boosta ahaan Waaxda Adeegyada Shaqaalaha sida ugu dhakhsaha badan si ayna galdalool usoo gelin caymiskaaga medicaid.

Waxay u baahan karaan macluumaad dheeraad ah si ay u arkaan in aad weli u qalanto Medicaid. Waxay kuusoo diri doonaan warqada uu la socda foomamka aad buuxinayso oo waxay dalban karaan waraaqo xoojin ah (sida waraaqaha mushaharka, bayaanka bangiga, iwm.) hadii loo baahdo. Buuxi foomamka oo waxa aad u dirtaa sida ugu dhakhsaha badan ee macquulka ah si loo baajiyo in wax galdaloolo ay ku yimaadaan caymiska caafimaadka.

U dir foomamka buuxa ee la naqdinayo:

DWS, PO Box 143245, Salt lake City, UT 84114-3245



Sidee ayay wax noqonayaan hadii aanan dirin waraaqaha ama waraaqaha xoojinta ah?

Waxa aad waayi kartaa caymiskaaga caafimaadka Medicaid. Ugu dir wixii foomamka ah ama waraaqaha xoojinta ah Waaxda Adeegyada Shaqaalaha sida ugu dhakhsaha badan. Waxaad haysataa **90 maalmood** inaad ku dalbato in dib u eegid lagu sameeyo kiiskaaga hadii aad waydo gunooyinkaaga Medicaid maadaama oo aanad doo dirin waraaqaha ama waraaqaha xoojinta ah.

U dir foomamka buuxa ee la naqdinayo:

DWS, PO Box 143245, Salt lake City, UT 84114-3245)

Maxaan samayn karaa hadii aan waayo caymiskayga caafimaadka Medicaid?

Waxa la doonayaa in dhamaan dadka reer Utah ay helaan caymiska caafimaadka oo ay ku jiraan. Waxa aad heli doontaa waxyaabaha soo socda hadii aanad u qalmin

Medicaid wixii intaa ka danbeeya:

- Warqad kuu sheegeysa marka caymiskaaga caafimaadka Medicaid uu ku eeg yahay.
- Waxaa si toos ah loogu wareejin doonaa [Health Insurance Marketplace ee federalka](#) (ilaa inta aad soo dirto waraaqaha iyo waraaqaha xoojinta ah ee loo baahan yahay).
- Macluumaadka ku saabsan [Health Insurance Marketplace ee federalka](#).
- Macluumaadka ku saabsan sida aad rafcaan u dalban karto. Tani waxay ka dhigan tahay inaad dalban karto in kiiskaaga la naqdiyo mar kale hadii aad u aragto in aad u qalanto, laakiin Waaxda Adeegyada Shaqaalaha ay kuu soo dirtay warqad ay kuugu sheegeyso in aanad wixii intaa ka danbeeya u qalmin Medicaid.

U fiirso wakhtiga ay ku eeg tahay.

- Waa inaad ku xaraysaa rafcaanka 90 maalmood gudahood.
- Si toos ah **laguuguma** wareejin doono health insurance marketplace ee federalka ah hadii aad waydo gunooyinkaaga Medicaid maadaama oo aanad soo celin waraaqaha ay kaa dalbadeen.

Maxay ka dhigan tahay in si toos ah laguugu wareejiyo health insurance marketplace federalka ah?

Dadka aan wixii intaa ka danbeeya u qalmin Medicaid ayaa si toos ah loogu wareejin doonaa Health Insurance Marketplace ee federalka ah (healthcare.gov). Waxaa jira wakhti xaadirkan nidaam toos ah oo lagu wareejiyo oo jira ilaa inta go'aanka la gaadho. Wareejintu



dhici mayso hadii aad ku waydid caymiska Medicaid maadaama oo aanad buuxin ama aanad soo celin waraaqahaagii.

Ikhtiyaaro caymis caafimaad oo kale oo nooc ee ah ayaa jira?

Dadka aan u qalmin caymiska caafimaadka Medicaid waxay weli heli karaan caymis ay ka helaan Health Insurance Marketplace oo federal ah ama [healthcare.gov](https://www.healthcare.gov). Badanaa dadku waxay u qalmaan yaraynta kharashka caymiska caafimaad oo waxaa laga yareeyaa kharashka bishii iyo wada bixinta. Yarayntu waxay ku salaysan tahay cabirka iyo dakhliga qoyskooda. Dhamaan caymisyada Marketplace waxay bixiyaan waxyaabaha sida dawooyinka la qoro, booqashooyinka dhakhtarka, daryeelka degdega ah, booqashooyinka isbitaalka, iyo wax kale oo badan.

Dadka waaya Medicaid waxay haystaan 60 maalmood oo ay ku dalban karaan caymiska caafimaadka ee Marketplace. Caymiska caafimaadka caadiyan waxa uu leeyahay wakhti isdiiwaangelin oo furan sanad walba marka dadku isku duwaan gelin karaan caymiska caafimaadka. Waxa ay kaliya u ogolaadaan ruuxu inuu isduwaan geliyo wakhtiga isdiiwaangelinta furan, iyada oo ay qabaan moojee "xaalad nolosha oo u qalanta". Waxaa la tixgeliyaa "xaalad nolosha oo u qalanta" hadii qof aanu u qalmin Medicaid wixii intaa ka danbeeya. Tani waxay ka dhigan tahay inay dadku haystaan **60 maalmood kadib marka ay ka dhamaato gunooyinka Medicaid** inay isku duwaan geliyaan caymiska caafimaadka ee cusub.

Waa inaad weli sugto ilaa wakhtiga danbe ee uu furmayo ku biiritaanka hadii aanad isku duwaan gelin caymis caafimaad oo cusub 60 maalmood gudahood marka gunooyinkaaga Medicaid ay dhamaato. Waxaa sidoo kale muhiim ah inaad ogaato inaan si toos ah **laguugu** wareejin doonin health insurance marketplace ee federalka ah hadii aad waydo gunooyinkaaga Medicaid maadaama oo aanad wakhtiga ay ku eeg tahay aanad kaga soo jawaabin, ama aanad soo celin waraaqaha ama waraaqaha xoojinta ah ee ay kaa dalbadeen DWS.

Waa maxay "dhacdada nolosha ee u qalantaayi?"

- Guursashada ama kala taga.
- Inaad dhasho ama korsanayso ilme.
- In qof deganaa gurigaaga uu dhintay (qof aad cashuurta ku dalban jirtay).



- Cabirka qoyska ayaa is bedeley (tani waxaa weeye tirada dadka ee aad cashuurta ku dalbato).
- Dakhliga qoyskaaga ayaa is bedeley (oo kordhay ama hoos u dhacay).
- Uma qalantid Medicaid ama CHIP iminka maadaama oo dakhligaagu uu kordhay.
- Waxa aad wayday caymiskaaga caafimaadka ee aad kaga jirtay cida aad u shaqayso ama shaqada.
- Caymiskaaga caafimaadku waxa uu kaa joojiyay caymiska, inkasta oo aad bixisay kharashka caymiska.
- Caymiskaaga COBRA wuu dhacay.
- Waxa aad noqotay 26 jir oo kuma sii jiri kartid caymiska caafimaadka ee waalidkaaga wixii intaa ka danbeeya.
- Waxaad u guurtay magaalo, gobol ama ZIP koodh kale.
- Waxaad kasoo baxday xabsi ama jeel.
- Waxa aad ka kulantay tacadi guriga dhaxdiisa ah.
- Khalad ayaa kaa horjoogsaday inaad hesho caymiska caafimaadka markii aad ka baxday Ciidamada.

La hadal 211 si aad uga qabsato balan bilaash ah [Take Care Utah](#) hadii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo inaad isku duwaan geliso caymis caafimaad oo cusub.

Miyaa caymiskayga caafimaadka ee cusub noqonayaa qaali?

Badanaa dadku waxay u qalmaan yaraynta kharashka caymiska caafimaad oo waxaa laga yareeyaa kharashkaaga bishii iyo wada bixinta. Yarayntu waxay ku salaysan tahay cabirka iyo dakhliga qoyskaaga. Dhamaan caymisyada Marketplace waxay bixiyaan waxyaabaha sida dawooyinka la qoro, booqashooyinka dhakhtarka, daryeelka degdega ah, booqashooyinka isbitaalka, iyo wax kale oo badan.

Sidee ayaan u xarayn karaa rafcaan?

Rafcaanku waxa uu ka dhigan yahay inaad ka dalbato Waaxda Adeegyada Shaqaalaha in kiiskaaga la naqdiyo mar kale hadii aad u aragto in aad u qalanto, laakiin ay kuu soo dirtay warqad ay kuugu sheegeyso in aanad wixii intaa ka danbeeya u qalmin Medicaid. Haddii aanad ku qancin go'aanka u qalanka oo aad doonayso inaad rafcaan ka qaadata go'aanka, dalabka dhagaysiga waa in lagu soo diraa 90 maalmood gudahood oo ka bilaabanta taariikhda wargelinta aanad ku qancin.



Dhagaysiga cadaalada ah ee Medicaid iyo CHIP u qalankooda waa in lagu xareeyaa Waaxda Adeegyada Shaqaalaha (DWS), Waaxda Cadaalada. Waa inaad buuxiso foomka oo aad kusoo celiyo DWS. Booqo [websaytka DWS](#) si aad u hesho foomka iyo macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dhagaysiga cadaalada ah. Hadii aad qabto su'aalo, iimeel ayaad ugu diri kartaa fairhearings@utah.gov ama la hadal 1-877-837-3247.

U dir nuqulkaaga buuxa ee dhagaysiga cadaalada ah:

Department of Workforce Services – Fair Hearings
PO Box 143245, Salt Lake City, UT 84114-3245

Miyaan buuxin karaa naqdintayda Medicaid wakhti hore?

Maya. Waxa aanu kaa dalbanaynaa in aad sugto ilaa inta kiiskaaga la mudaynayo in la naqdiyo maadaama oo ay jiraan kiisas badan oo la naqdinayaayi. Waxba inaad samayso lagaagama baahna illaa inta kiiskaaga la naqdinayo. Waxa aad u isticmaali kartaa gunooyinkaaga sida caadiga ah ilaa inta naqdintaada la dhamaystirayo.

- Xaqiiji in aanu kaa hayno macluumaadka xidhiidhka ee saxda ah adiga. Waxa aad eegi kartaa si aad u xaqiijiso in aanu gelino macluumaadka ugu danbeeya xisaabtaada [myCase](#).
- Geli macluumaadkaaga ugu danbeeyay hadii aad dhawaan guurtay ama hadii wax kamid ah macluumaadkaaga xidhiidhka ah la bedeley (sida lambarka taleefanka ama cinwaanka iimeelka).

Sidee ayaan u heli karaa naqdin dhakhso ah?

Waxba inaad samayso lagaagama baahna illaa inta kiiskaaga la naqdinayo. Waxa aad u isticmaali kartaa gunooyinkaaga sida caadiga ah ilaa inta naqdintaada la dhamaystirayo. Laakiin, waxaa jira dhawr shay oo aad samayn karto si aad u dedejiso oo aad u fududayso nidaamka:

- Geli macluumaadkaaga ugu danbeeyay hadii aad dhawaan guurtay ama hadii wax kamid ah macluumaadkaaga xidhiidhka ah la bedeley (sida lambarka taleefanka ama cinwaanka iimeelka). Waxa aad ka cusboonaysiin kartaa macluumaadkaaga xisaabtaadaada [myCase](#).
- Waaxda Adeegyada Shaqaalaha waxay kuu sheegi doontaa hadii ay u baahan tahay waraaqo xoojin ah si loo eego inaad weli u qalanto Medicaid (sida waraaqaha mushaharka, bayaanka bangiga, iwm.). **Usoo dir kuwan sida ugu dhakhsaha**



badan. Tani waxay gacan ka gaysanaysaa in si dhakhso ah inay u dhameeyaan naqdinta shaqaalaha u qalanku.

Maxaan samaynayaa hadii aanan deganayn Utah?

Utah Medicaid waxaa kaliya loogu talo geley dadka degan gobolka Utah. Waa **inaad** la hadasho Waaxda Adeegyada Shaqaalaha oo aad u sheegto inaad u guurtay gobol kale.

Sidee ayaan u xidhi karaa kiiskayga Medicaid?

La hadal Waaxda Adeegyada Shaqaalaha 1-866-435-7414 oo ka dalbo inay xidhaan kiiskaaga.



Sidee ayaan u caawiyaa qof waayay caymiskiisa caafimaadka ee Medicaid?

Xaqiiji in macluumaadka ruuxu uu cusboon yahay.

Waxay ka eegi karaan onleyn ahaan si ay u xaqiijiyaan in macluumaadkoodu uu saxan yahay ku jira xisaabtooda [myCase](#) ee [jobs.utah.gov/mycase](#) ama waxay la hadli karaan mid kamid ah kuwa soo socda si ay u cusboonaysiiyaan macluumaadkooda:

- Qorshahooda caafimaadka
- Waaxda Adeegyada Shaqaalaha 1-866-435-7414
- Wakiilka barnaamijka caafimaadka 1-866-608-9422

U sheeg ruux inuu u fiirsado xisaabtiisa myCase, iimeelada, iyo boosta.

Waaxda Adeegyada Shaqaalaha waxay cusboonaysiin doontaa xisaabtooda myCase oo waxay u diri doontaa warqad ama iimeel kadib marka kiiska dib u eegida lagu sameeyo. Warqadan waxaa ku qoran **hal** kamid ah kuwa soo socda:

- Waxay weli u **qalmaan** caymiska caafimaadka ee Medicaid.
- **Uma qalmaan** Medicaid wixii intaa ka danbeeya. Warqadan waxa ku qornaan doona talaabooyin ay qaadi karaan si ay u helaan caymis caafimaad oo kale.
- **Macluumaad dheeraad ah ayaa loo baahan yahay** si loo eego hadii weli loo qalmo Medicaid. Warqadan waxaa la socda foomamka ay buuxinayaan oo waxay dalban karaan waraaqo xoojin ah (sida waraaqaha mushaharka, bayaanka bangiga, iwm.). **Waa inay u diraan kuwan sida ugu dhakhsaha badan ee ay awoodaan—si ayna u dhaafin wakhtiga uu ku eeg yahay.**

Xaqiiji in qofku uu ogaado inuu haysto **90 maalmood** oo kaliya inay ka dalbadaan Waaxda Adeegyada Shaqaalaha inay dib u eegid ku samayso hadii uu waayo gunooyinka Medicaid maadaama oo aanu u dirin waraaqaha ama waraaqaha xoojinta. Waxaa sidoo kale muhiim ah in loo sheego qofka in aan si toos ah **loogu** wareejin doonin health insurance marketplace ee federalka ah hadii uu waayo gunooyinkiisa Medicaid maadaama oo aanu wakhtiga ay ku eeg tahay aanu kusoo jawaabin, ama aanu u soo celin waraaqaha ama waraaqaha xoojinta ah.



Ka caawi ruuxa inuu iska duwaan geliyo caymis caafimaad oo kale.

Dadka waayay caymiska caafimaadka Medicaid maadaama oo ayna soo celin waraaqaha, waxay weli haystaan 90 maalmood inay dib u soo ceshadaan caymiskooda. U sheeg inay dib u soo diraan foomka ama waraaqaha kale ee dib u eegista ee DWS u baahan tahay markaba.

Dadka aan u qalmin caymiska caafimaadka Medicaid waxay weli heli karaan caymis ay ka helaan **Health Insurance Marketplace oo federal ah ama [healthcare.gov](https://www.healthcare.gov)**. Badanaa dadku waxay u qalmaan yaraynta kharashka caymiska caafimaad oo waxaa laga yareeyaa kharashka bishii iyo wada bixinta. Yarayntu waxay ku salaysan tahay cabirka iyo dakhliga qoyskooda. Dhamaan caymisyada Marketplace waxay bixiyaan waxyaabaha sida dawooyinka la qoro, booqashooyinka dhakhtarka, daryeelka degdega ah, booqashooyinka isbitaalka, iyo wax kale oo badan.

Dadka waaya Medicaid waxay haystaan 60 maalmood oo ay ku dalban karaan caymiska caafimaadka ee Marketplace. Caymiska caafimaadka caadiyan waxa uu leeyahay wakhti isdiiwaangelin oo furan sanad walba marka dadku isku duwaan gelin karaan caymiska caafimaadka. Waxa ay kaliya u ogolaadaan ruuxu inuu isduwaan geliyo wakhtiga isdiiwaangelinta furan, iyada oo ay qabaan moojee "xaalad nolosha oo u qalanta". Waxaa la tixgeliyaa "xaalad nolosha oo u qalanta" hadii qof aanu u qalmin Medicaid wixii intaa ka danbeeya. Tani waxay ka dhigan tahay inay dadku haystaan **60 maalmood kadib marka ay ka dhamaato gunooyinka Medicaid** inay isku duwaan geliyaan caymiska caafimaadka ee cusub.

Booqo [healthcare.gov/medicaid-chip/transfer-to-marketplace/](https://www.healthcare.gov/medicaid-chip/transfer-to-marketplace/) wixii macluumaad dheeraad ah.